

— 801 —

Qodobka 92aad

Ku dhawaaqiddda xukunka iyo waxyaabaha laga helayo

Xukunnada waxay ku soo baxayaan magaca dadweynaha Soomaaliyeed, waana in laga helaa:

1. Magaca Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.
2. Tilmaanta Maxkamadda.
3. Tilmaanta dhinacyada iyo qareennadooda.
4. Dalabaatka gabagabeynta ee dhinacyada.
5. Qaadidda dacwadda oo gaaban iyo sababaha xukunka.
6. Go'aanka, taariikhda iyo saxiixa garsooraha. *iyoo KAALIYAHHA.*

Haddii mid ka mid ah Garsoorayaasha ka qayb galay Maxkamadda ay u suurtoobi weydo inuu saxiixo xukunka, geeri darteed, ama sabab kale oo ka hor joogsatay awgeed, waxaa lagu kaaftoomaayaa saxiixa xubnaha kale, ayadoo la xusaayo sababta ka hor joogsatay saxiixa kii maqan.

Qodobka 93aad

Faafinta xukunka iyo gaarsiintiisa

Xukunka waxaa lagu faafinaayaa ayadoo la dhigo Xafiiska Kaaliyaha. Kaaliyaha wuxuu caddeynaayaa kenidda xukunka, wuxuuna gaarsiinaayaa dhinacyada ka qayb galay dacwadda.

QAYBTA AFRAAD

GAARSIIN

Qodobka 94aad

Ogeysiis (Comunicazione)

Waxaa sameynaaya Kaaliyaha, isagoo siinaya warqad qofka gaarsiinta ay u socoto, kaasoo laga reebayo nuqi laga saxiixay ama waxaa lagu dirayaa Boostada rakomandaatada ah ama waxaa loogu dhiibayaa gaarsiiyaha Maxkamadda.

Qodibka 95aad

Gaarsiinta (Notifiche)

Waxaa sameynaaya gaarsiiyaha isagoo u dhiibaya qofka ay u socoto gaarsiintu nuqul la mid ah ka asalka ah ee dokumentiga la gaarsiinayo.

— 802 —

Qodobka 96aad

Gaarsiinta gacan ka saaridga ah

Gaarsiiyuhu isagoo fulinaya Gaarsiinta waa inuu nuqulka lagu xusay Qodobka hore. gacanta ka saaraa qofka ay u socoto Gaarsiintu meel kasta ha joojee. Hadduu diido qofka ay u socoto gaarsiintu in uu qaato nuqulka, gaarsiiyuhu wuxuu taas ku caddaynayaa warqadaha gaarsiinta, waxaana loo qaadanayaa in gaarsiintii la fuliyey.

Qodobka 97aad

Ku gaarsiinta meesha degganaashaha, guriga ama negaanshaha

Haddii la waayo qofka gaarsiintu u socoto, waxaa bannaan in loo dhiibo nuqulka warqadaha gaarsiinta qof ka mid ah Qoyskiisa ama qof kula nool guriga ama Xafiiska kala shaqeeya. Waxaana shardi ah in qofka loo dhiibaayo sannadkiisu ka yaraan 15, uusanna ahayn qof garaad la'aantiisu caddahay.

Qodobka 98aad

Ku gaarsiinta jidka Boostada

Haddii ay suurtoobi waydo fulinta gaarsiintu sida lagu tilmaamay Qodobbada hore, gaarsiiyuhu wuxuu ku dhejinayaa nuqulka gaarsiinta Looxa ogeysiiska ee Maxkamadda horteda ee Dacwaddu ka socoto, wuxuuna sidaas ku ogeysiinayaa qofka gaarsiintu ay u socoto Boostada Rekomandaatada ah iyadoo ay la socoto hubsasho helitaan.

Qodobka 99aad

Ku gaarsiinta meesha negaanshaha la doortay

Haddii qofku doorto meel negaasha u ah sida waafaqsan Xeerka Madaniga waa bannaan tahay in lagu gaarsiiyo halkaas Negaanshaha u ah.

Qodobka 100aad

Gaarsiinta qofka aan cegganayn guri iyo negaanshana aan ku lahayn Jamhuuriyadda

Haddii qofka gaarsiintu u socoto uusan degganayn ama ku negayn Dalka Soomaaliya, uusanna ku lahayn Wakiil, waxaa lagu gaarsiinayaa in lagu dhejiyo Nuqul ka mid ah warqadaha gaarsiinta looxa ogeysiiska Maxkamadda horteda dacwaddu ka doorto nuqul kalana waxaa loogu dirayaa Boostada Rekomandaatada ah.

— 803 —

Waxaa loo dhiibayaa Nuqul saddexaad Xeer ilaaliyaha Guud, kaasoo ay waajib ku tahay in uu u diro qofka Gaarsiintu u socoto isagoo marsiinaya Jidka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Jidka Diblemaasiyada.

Qodobka 101aad

Gaarsiinta qofka degmadiisa iyo gurigiisa aan la aqoon

Haddii aan la aqoon qofka gaarsiintu u socoto meeshii degmadiisa ama gurigiisa ugu dambaysey gaarsiintu waxay ku sugnaanaysaa iyadoo lagu dhejiyo Maxkamadda horteeda ay dacwadou ka socoto, Nuqul ka mid ah Dokumentiga Gaarsiinta. nuqul kalena waxaa loo dhiibayaa Xeer Ilaaliyaha Guud, Xaaladaha lagu xusay qodobkaan iyo qodobka horeba gaarsiintu waxaa loo qaadanayaa inay ku dhammaaneyso maalinta 30aad, laga billaabo markii la dhammeeyey «Formaalitada» Shuruudaha la doonaayo.

Haddii gaarsiinta lagu sameeyo sida waafaqsan qodobkan iyo kii ka horreeyey, waxaa loo qaadanayaa in gaarsiinta la fuliyey maalinta 30aad laga billaabo markii la dhammeeyey tillaabooyinka loo baahan yahay.

Qodobka 102aad

Gaarsiinta u socota Maamulka Dawladda

Gaarsiinta u jeedda maamulka dawladda, waxaa la geynayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, haddii ayna jirin qodobbo gaar ah.

Qodobka 103aad

Gaarsiinta qofka shakhsiyad qaanuuneed leh (persone Curdiche)

Gaarsiinta qofka shakhsiyad qaanuum leh waxaa la geynayaa Xafiiskiisa iyadoo loo dhiibayo qofka Wakiilka u ah ama qof kasta oo Xafiiskaas ka shaqeeya.

Qodobka 104aad

Gaarsiinta Askarta ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida

Haddii Gaarsiintu ay u socoto askari shaqa haya, ayna suurtoobaynin in isaga gacanta laga saaro, gaarsiinta waxaa loo dirayaa Xeer Ilaaliyaha Guud, kaasoo ay waajib ku tahay inuu u diro Taliyaha Ururka uu ka mid yahay Askarigaasi.